**Diwaan gelinta carruurta dhaaftay wakhtigii wax-barashada waa mid can ah, iyadoo ay raacdo juquragia iyo iyo arrimaha la xiriira sinaan la'aanta ka dhex jirta gabdhaha iyo wiilashada markay noqoto diwaan gelinta.** Qiyaasta 27 boqolkiiba carruurta iskuulada hoose loo diwaan geliyo waa kuwo ka weyn da'da 13 jir, halka 55 boqolkiiba tiro ka badan oo ah kuwa dugsiyada sare loo diwaan geliyo ma ahan kuwo da'doodu tahay inta u dhaxaysa 14 ilaa 17 jir. Carruurta Soomaalidu waxay dugsiyada hoose wax barashadooda bilaabaan xilli danbe, iyagoo waalidiintu ay rumaysan yihiin in carruurta 6 ilaa 9 sano jirka ah ay weli yihiin kuw

yar yar oo aan waxbarasho gaarin. Carruurta isku-lada la geeyo ee da'doodu u dhaxaysa 6 ilaa 13 waa 33 boqolkiiba keliya meelaha magaalooyinka ah. Diwaan gelinta iskuulada carruurta da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 13 ee ku nool Muqdisho iyo magaalooyinka kale laba goor ayey tiro ahaan ka badan yihiin marka loo eego carruurta ku nool miyiga iyo xeryaha dadka gudaha ku barakacay ku nool yihiin, iyagoona lix goor ka sii badan carruurta qoysaska reer guuraaga. Sinaan la'aanta juquraafi ee diwaan gelinta dugsiyada sare da'ahaan 14 ilaa 17 jir waa mid iyana cad. Iyadoo aysan jirin kala duwanaa dhedig iyo lab heeka diwaan gelinta iyo sababaha aysan u aadayn iskuulada carruurta da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 13 jir, wuxuuse ka jira farqiga kala duwaanta dhedigga iyo labku marka la gaaro da'da u dhaxaysa 14 ilaa 17; wiilasha iskuulada aad ayaa ka badan gabdhaha marka la gaaro da'daan, tanoo ay ugu wacan tahay heerka saboolnimada iyo waxyaabo kale oo nolosha qoyska ku xeeran. Sababaha ugu waaweyn ee wiilasha da'da heerkaani ahi aysan iskuulada u aadayn waxaa ugu weyn lacag la'aan, halka gabdhuhuna ay shaqada guriga qabtaan. Reer guuraaga iyo gabdhaha ayaana caqabadda ugu weyni haysataa.



**Sinaan la'aanda ka taagan waxbarashada eek u salaysan dhedig/laboodka iyo tan goboleed waxay la xiriiirta heerka waxbarashada Soomaalida.** Waxbarahsadu waa qodob muhiim ah kororka taakulada iyo in adhxada laga jebiyu saboolnimada wareegta. Keliya kala bar dadka Soomaaliyeed ayaa wax qora waxna akhriya, heerka aqoon la'aantu waa mid can ka dhex ah da'yarta, dadka

magaalooyinka ku nool iyo ragga. Waxaa taas la mid ah dadka kunool miyiga iyo degsiimooyinka xeryaha lagu barakacay, iyadoo reer guuraagu ihiin kuwo aan nidaam waxbarasho haysa 1.6, 2.6 iyo 2.5 goor wax ka badan, waxaa intaas dheer, iyadoo magaalooyinka dadka kunoolna ay ka sii badan yihiin. Dadka waaweyn ee Soomaalidu waa kuwo iyagu leh aqoon rasmiya marka loo eego dadka yar yar, haweenkuna waa kuwo aan waxbarasho la'ahayn marka loo eego ragga. Waxaa intaas dheer, carruurta ayaa ah kkuwo inta badan loo diwaan geliyo dugsiyada marka hogaamiyaha qoyska yahay qof wax yaqan. Inkastoo diwaan gelinta dugsiyada ay ku korayso magaalooyinka, haddana inay dhamaystaan waxbarashada dugsiyada hoose waa mid yar, keliya 11 boqolkiiba da'da 15 ama ka badan oo galay dugsiyada hoose ayaan dhamaysan.

**Magaalooyinka caadi ahaan waa kuwo heerkooda nololeed uu sareeyo, waxayna leeyihiin helitaan adeegyo marka loo eego miyiga, marka laga reebo helitaanka dhulka iyo guriyeynta**

**Magaalooyinka Soomaalidu waa kuwo ay hoo-sayso saboolnimada lacagta, waxayna leeyihiin helitaanka adeegyo ka wanaagsan marka loo eego miyiga.** Heerka saboolnimada celi celis ahaan ee magaalooyinka ay ka mid tahay Muqdisho waa 64% marka la bar bar dhigo 69% qaran ahaan, 72 boqolkiiba waa miyiga, halka 76 boqolkiiba ay tahay dadka ku nool xeryaha dadka gudaha ku

■ Haweenka dhamaan qaybaha kala duwan bulshada waxaa ku hooseya tacliinta iyo helitaankeeda





barakacay ku nool yihiin. Waxaa ku jirin Muqdisho, meelaha saboolnimadu ay ka korayso heerka qaran ama meelaha miyiga ah. Magaalooyinka waxaa si caadi ah looga helaa adeegyo wanaagsan marka laga reebo dhulka iyo guriyeynta, waaxana joogto ah dakhliga qofka soo gala marka loo eego dhulka miyiga ah. Helitaanka korontada, biyaha, xada wanaagsan, caafimaadka, guriyeynta iyo internetka waa mid ku saraysa magaalooyinka iyadoo aan la eegin heerka saboolnimada, ha ahaadeen qoysaska xeryaha lagu barakacay ama qoysaska ay haweenka masuulka ka yihiin. Qoysaska miyigu waxay kaga wanaagsan yihiin kuwa magaalooyinka helitaanka dhulka iyo guriyeynta; waxaana tan ugu wacan cabsida dhulka iyo qimaha sare ee uu dhulku joogo, qoysaska magaalooyinku inta badan ma lahan dhul ay leeyihiin. Magaalooyinka Somaa-liya waa meelaha ugu badan ee shaqaalaynta iyo heli taanka lacagaha xawalaadaha laga helo, iyadoo magaalooyinka laga helo shaqooyinka ugu badan iyo adeegyada xawaaladaha, iyo iyadoo shaqada magaalooyinka aysan ku xirnayn duruuf, waxaana laga helaa dakhli joogto ah marka loo eego qoysaska beeraha ama ganacsiga ku jira.

**Inkastoo xaalado wanaagsan ay ka jiraan magaalooyinka, waxayna la tacaalaan gaa-jada, heerka koreeya ee saboolnimada oo ah 64 boqolkiiba, saboolnimada aan waxyaabaha lacagta ahayn waa 41 boqolkiiba iyo xaqiijinta helitaanka adeegyada guud.** Magaalooyin badan ayaan lahayn xeryo barakacayaal ah oo balaaran.

Taasoo ka dhalatay culaysyada dhulka, guriyeynta iyo adeegyada kale oo koreeya iyadoo 75 qoysaska gudaha ku barakacay ay degan yihiin magaalooyinka.


**Magaalooyinka Muqdisho, waqooyi bari iyo waqooyi galbeed ku yaal ayaa adeegyo wanaagsan laga helaa marka loo bar bar dhigo magaalooyinka Baydhabo, Kismaayo iyo kuwa bartamaha ku yaal.** Iyadoo Muqdisho tahay magaalada heerka saboolnimadu ugu koreeyo marka laga reebo Baydhabo, helitaanta adeegyada ay ka midka yihiin korantada, biyaha, saxada, guriyeynta, waxbarashada iyo caafimaadku waa md ku saraysa Muqdisho. Kismaayo oo ah meesha saboolnimada ugu hoosaysa weli waa mid adeegyadaan ku hoosaysa. Waxaa xiiso badan in helitaanka biyaha, waxbarashada iyo shaqaalayntu aad aad ugu fiican tahay degsimooyinka barakacayaasha marka loo eego gudaha Kismaayo. Magaalada Baydhabo waa tan saboolnimada ugu saraysa, waxaana la wariyey in helitaanka adeegyadaani hoosayso. Magaalooyinka waqooyi galbeed iyo waqooyi bari waa kuwo si isku mid ah ay u hagaagsan tahay helitaanka adeegyadaan, halka magaalooyinka bartamaha wadanka ku yaal la'yihiin. Magaalooyinka waqooyi bari iyo waqooyi galbeed waa kuwo aan qulqulatooyinka ka dhicin, waana goobo helitaanka adeegyadaani sareeyo; 86 boqolkiiba dadka ku nool magaalooyinka waqooyi galbeed waa dad dareema inay ku nool yihiin amaan. Waxaa dhidibada u taagan hay'adihii maamulka dawli,

■ Magaalooyinka waxaa laga helaa adeegyo ka wanaagsan kuwa miyiga





■ Calamadaha muujinaya sida gobolladu ugu kala duwan yihin helitaanka adeegyada



Isha xogta waa tirakoobka 2017–18.

Iyadoo adeegyaday bixiyaan ay ku tiirsan yihiin taageero dibadeed. Dawlad hoosaadyadu waa kuwo hadda ka unkamaya Baydhabo, Kismaayo iyo magaalooyinka bartamaha wadanka ku yaal, iyadoo deegaanadaan wakhti dhow laga xoreeyey ururka Alshabaab, welina dhulkooda miyiga ah oo balaaran waxaa xukuma Alshabaab.

**Barakacayaasha ku sugan gudaha magaalooyinka way kaga wanaagsan yihiin helitaanka adeegyada marka loo eego barakacayaasha ku sugan miyiga, laakiin waxay layihiin guri**

**Barakacayaasha magaalooyinka, inkastoo ay xaaladoodu ka liidato qoysaska magaalooyinka ee aan iyagu ahayn barakacayaasha, haddana waxay ka fiican yihiin qoysaska barakacayaasha ah ee ku sugan miyiga.** Iyadoo aan loo eegayn in barkacayashau ay ku nool yihiin xeryaha ama aysan ku noolayn, haddana waxay heli karaan korontada, guriyeyn iyo saxo marka loo eego barakacayaasha dhulka magaalooyinka ka baxsan ku nool. Sidaa darteed, barakacayaasha magaalooyinka adeegyaday ka helaan waa kuwo kooban markay noqoto korantada, biyo tuubooyin soo qaadaan, saxadda, guriyeynta, lahaanshaha dhulka iyo internetka marka loo barbar dhigo dadka aan iyagu barakaca ahayn ee magaalooyinka ku nool. Waxaa intaas dheer, barakacayaasha magaalooyinka ku nool waa kuwo ay aad u hoosayso isu diwaan gelinta, waxbarashada iyo heerka shaqaalayn, waxayna u muuqdaan in noloshooda ay kala soo baxaan

iskuulada hoose iyo suuqyada cuntada. Qoysas badan oo barakacayaasha magaalooyinka ah ayaa isaga haray wixii noloshoodii hore ku tiisanayd, hantidii maguurtada ahaa ee ay lahaayeen iyo xiriirka bulsho, tanoo aan u keenin faa'iido dhinaca waxbarashada iyo helitaanka shaqo wanaagsan.

**Qoysaska ku nool goobaha xeryaha dadka ku barakacay ku yaalaan ee magaalooyinka oo ah kuwa marti geliyey barakacayaasha ma ahan kuwo ka xun qoysaska kale ee magaalooyinka**

**Ma jiro wax farqi ah oo kala duwanaansho oo la taaban karo oo u dhexeeya bulshada ku nool magaalooyinka marti geliyey barakacayaasha iyo bulshooyinka aan marti gelin.** Halka ay u malaynayaa bulshada marti gelisay barakacayaashu in ka qaateen helitaanka adeegyada ay ka mid ka yihiin shaqoyinka, guriyeynta, xogta sahan ku waxay tilmaamaysaa in heerka helitaanka adeegyada iyo heerka saboolnimada ee bulshada marti gelisay barakacayaasha iyo kuwa aan marti gelin ay isku mid tahay. Waxayna tani noqon kartaa in aan weli la taaban karin sida bulshada barakacayaasha marti gelisay ay u saameeyeen ama bulshada marti gelisay barakacayaasha aysan wax adeegyada ahi ka xumaan iyagoo siiyey barakacayaasha dhul ay degsiimaystaan. Inay dhulalkaas sii degenadaan waa mid isbedeli karta had-dii barakacayaashu ay wakhti dheer ku sii sugnaadaan magaalooyinka ama la waayo taageerada bani'aadanimo ee hay'addaha gargaarku siiyaan.

**Sii socoshada barakaca waxay abuuraysaa kicin magaalooyinka, adeegyada ay heliyaan ayaana caqabad ku noqonaya degsiimooyinka cusub.**

Qiyaasta 75 boqolkiiba dadka ku barakacsan gudaha Soomaaliya waxaa la dejiyey dhul ay leedahay dawladda iyo dhulal gaar loo leeyahay oo ku yaal duleedada iyo gudaha magaalooyinka. Sidoo kale inta badan dadka soo noqday waxaa la dejiyey magaalooyinka. Iyadoo aysan jirin hab bedqab lahanaashaha dhulka ah, waxayna barakacayaashu u nugul yihiin in laga saaro dhulalkay degan yihiin. In ka badan 109,000 oo barakacayaal ah kuna noolaa degsiimooyiin aan rasmi ahayn oo wadanka ah ayaa si xoog ah looga saaray goobahay deganaayeen intii u dhaxaysay Janaayo ilaa Agoosto 2017 keliya, iyadoo 77 boqolkiiba laga saaray dhulal ku yaalay Muqdisho. Cooshada barakacayaasha ee ku yaal magaalooyinka waxay sababeen isdul saar iyo ciriir magaalooyinka ah iyo inay adkaato in la gaarsiiyo adeegyada, waxayna qiimo badan ku noqotay in dib u habayn lagu sameeyo kaabayaasha magaalooyinka. Deegamaynta isdul fuushan ee barakacayaasha waxay sidoo kale dhaawacday sidii barakacayaashu u heli lahaan fursado shaqo, waxayna xanibaad ku noqotay inay ka faa'iidaystaan fursadaha ka jira magaalooyinka.

**Soomaali badan ayaa u dayacan oo aan heli karin ka hortag dhibaatooyinka naxdinta leh**

**Qoysaska Soomaalidu waxay u nugul yihiin dhibaatooyinka ay ka midka yihiin masiibooyinka**


dabiiciga ah iyo waxyaabaha soo noqnoqda, sidoo kale dhacdooyinka naxdina leh eek u dhaca qoysaska sida dhaawacyada, dhimashada iyo shaqo la'aanta heerkooda ayaa koreeya. Naxdintaasi waxay sii kordhisaa saboolnimada ba'an iyo nuglaanshaha, waxay yaraysaa fursadaha dhaqaalaha iyo nolosha, waxay waxyelaysaa hantida iyo in ay xadiddo sidii ay u gaari lahaayeen inay beerahoodii qotaan, kalluumaystaan ama ay xoolahoodii raacdaan. Dhibaatooyinka soo noqnoqda ee keenay naxdinta waxaa ku sii kordhiyey Soomaalida iyadoo ay xadidan tahay helitaanka damaanad qaad dawladeed iyo mid gaar loo leeyahay oo dhibaatooyinkan wax ka qabto.

**Qiyaasta 66 boqolkiiba qoysaaska Soomaalida waxaa la sheegay inay soo mareen ugu yaraan hal dhacdo oo naxdin ku reebtay 12 bilood ee la soo dhaafay.**

Waxaana ugu wacan abaartii 2017, naxdinta ugu badani waxay la xiriirtaa arrimaha ka dhasha cimilada iyo saamaynta ay ku yeelatay dhaqaalaha nolosha. Dhaqaalaha xoolo dhaqato beeralayda, iyo wax helista qoysaska waxay ku xiran tahay hadba isbedelka ka dhasha cimilada. Qoysaska saboolka ahi waa kuwo usii nugul wax ka badan hal mar dhibaato ku dhacda. Waxaana naxdinta saamaynteeda ay sii korortaa marka qoysasku ay la kulmaan dhibaatooyin bada noo si isdaba joog ah ugu soo noqnoqda.

**Waxbarashada oo hoosaysa, ku tiirsanaanta tacabka beeraha, shaqo la'aanta, dhaqaalaha oo yar iyo tirada xubnaha inta qof ee qoyska ka**

■ Abaartu waa tan ugu badan ee la sheegay inay keentay naxdinta qoysaska Soomaalida



Isha xogta, sahanka tirakoobka 2017–18.

**kooban yahay oo badan ayaa ka dhigtay qoysaska kuwo u nugul dhibaatooyinka.**

Qaab dhismeedka qoyska ayaana saamayn ku leh waxyeelada dhibaataada. Qoysaska uu hogaamiyo qof aan wax baran qiyaasta 12 ilaa 24 boqolkiiba waxay ka badan yihiin dhibaataada abaartu keentay, dalagyada ka lumay iyo xoolaha marka loo eego qoysaska ay hormuudka u yihiin waalidka waxbartay. Qoysaska ku tiirsan tacabka beeraha dakhligooda soo gala saamaynta ugu wayn waxaa ku leh biyo yaraan, dalaga iyo xoolaha oo ka baaba'a, laakiin ma ahan kuwo ay la soo gudboonaato qiimo cunno oo qaaliya. Qoysaska hela gargaarka bani'aadanimoo waa kuwo inta badan la kulma dhibaatooyin ay ka qaadaan naxdin, taasoo la xiriirta hadba sida hagaagsan ama liidata ee gargaarku u gaaro.

**Inta badan dhamaan qoysaska Soomaalida ah ee dhibaataada soo maray waxaa la sheegay inay saamayn xun ku yeelatay dakhligooda soo gala, hantida ma guurtada ah ama isha cunnada ay ka helayaan.**

Qoysaska la kulmay dhaca ama dagaalada waxay ku waayeen hantidooda iyo xoolahooda qiimaha leh sida dhulka ama xoolaha. Soomaalida inta badan ay noloshoodu ku tiirsanayd beeraha iyo xoolaha, waxaa dakhligooda saamayn ku leh dalagga iyo xoolaha oo ka baaba'a iyo biyo yaraan. Waxaa taas la mid ah qiimaha cunnada oo koreeye oo hoos u dhig awoodooda wax iibsi iyo wax rasmiga ah ee dakhli ay u helaan maalintii.


**Abaartii dhowaanahan jirtay waxa uga sii dartay nuglaanshaha iyo inay khatar galaan nolosha maalaayiin Soomaali ah**

**Abaarta daran ee ka jirtay Soomaaliya 2017 waxay dhalisay xaalad bani'adanimoo oo daran oo ku khasabtay kala bar tirade dadka soomaaliyeed inay wajahaan cunno yaraan daran.**

Afar xilli roobaad oo isku xigta oo ah intii u dhaxaysay Abriil 2016 ilaa Diiseembar 2017 ayaa roobabkii la filayey baaqdeen tanina waxay sababtay abaarta daran ee ka jirta guuda ahaan wadanka, waxaa sii adkaaday haqab beelka cunnada, iyadoo cunno la'aan ay noqdeen 6.2 milyan oo Soomaali ah. Qiyaasta 2.4 milyan oo qof ayaana u baahan gargaar bani'aadanimoo si looga gacan siiyo waxyaabihii ay nolosha ka helayeen oo ka baaba'ay iyo in la yareeyo nafaqa darro ba'an oo ku habsata, 866 kun oo qof ayaa u bahan gargaar cunno oo degdeg ah si looga hortago macaluul. Roobabkii ayaa xoogaa la helay dhamaadkii 2017 iyo bilowgii 2018 kuwaa-soo xoogaa debciyey xaaladihii jiray, laakiin cunno la'aantu weli waa mid taagan.


**Abaartu waxay uga sii dartay dadkanuglaa, waxayna khatar gelisay noloshooda iyo inay barakacaan hal milyan oo qof oo Soomaali ah. Biyo iyo baad la'aan ayaana keenay in tiro badan oo xoolo ahi dhintaan, halka heerkii dhalista xooluhuna yaraado, tani waxay yaraysay 25 ilaa 75**

■ Cunno yaraantu waa mid kor u sii kacaysay xilli kastoo roobku yaraado



Isha xogtae: FEWSNET, WFP-VAM, iyo qoraalka xogta sahanka 2017–18.

Barakaca ka dhashay arrimaha la xiriira abaarta waxay gaartay halkii ugu saraysay bartamihii 2017



Isha xogta: UNHCR (2018a).

**boqolkiiba xoolo raacatada wixii ay haysteen qaybtii hore ee sanadkii 2017.** Abaartu waxay ku khasabtay Soomaalida inay hantidii ma guuraanka ahayd iyo waxay cunnada siisanayeen kaga dhamaadaan qiimaha biyaha iyo raashinka eek or u kacaya, iyadoo ay hoos u dhacday shaqada ay ka helayaan beeraha. Abaartu waxay yaraysa fayadhorka biyaha iyo saxada, waxayna kordhisay ajowga biyaha, iyadoo abaaruutu khatar ku tahay nolasha qoysaska, wax hayasiga dadka ayaa taasi ku khasabtay inay ka tagaan deeganadooda iya-goo ka raadinaya dawladda iyo bulshada caalamka gacanqabasho. Sanadihii 2016 ilaa 2017 abaartu waxay barakicisay qiyaasta hal milyan oo qof oo Soomaali ah.

**Abaartu waxay kordhisay tirade dadka saboolka noqonaya iyo gaajada badi qoysaska dadka nugul ee miyiga ku nool**

**Abaarta heerkeedu koreeyo ee haysata qoysaska miyiga qiyaas ahaan 24 boqolkiiba waa sabool, waxayna yihiin intooda badan kuwa aan haysan waxay cunaan.** Meelaha miyiga ah, abaarta daran ee ka jirta ayaa yaraysay wixii ay cuni lahaayeen dadku 19%, iyadoo sida warbixintu sheegayo 24 boqolkiiba ay korortay saboolnimada dadku. Abaartuna waxay adhxada ka jebisay inta badan wax haysigii qoysaska miyiga ku nool; halak saamaynta abaarta


ee saraysa aan la soo baandhigin samaynta rasmiga ah ee wax quudashada 10 boqolkiiba dadka saboolka daran ah ee miyiga ku nool., waxayna hoos u dhigtay 17 boqolkiiba wax quudashada qoysaska miyiga taasoo ahayd 20 boqolkiiba, iyadoo inta u dhaxaysa 20 ilaa 30 boqolkiiba 80 boqolkiibadii ugu sareeyey qoysaska miyiga.

**Iyadoo heerka gaajadu ay kor u kacday guud ahaan gobollada Soomaaliya, qoysaska miyigu waa kuwa ugu daran ee abaartu ay sida xun u saamaysay.** Saamaynta abaarta ee saraysa waxay keentay inay 16 boqolkiiba ay hoos u dhacdo cunaday cunaan, waxaa raacda 17 boqolkiiba koror ah oo iyana gaajo joogto ah la soo deristay bishii Diiseembar 2017. Abaartu wax saamaynta la taaba nkaro kuma yeelan gaajada iyo saboolnimada qoysaska magaalooyinka ku nool.

**Barakaca guduhu waa mid sii kordhayey sanadihii la soo dhaafay, waxa ugu weyn ee keenayna waa abaarta**


**Barakaca dadka gudaha ku barakacayaa wuxuu ahaa mid soo kordhaya sanadihii la soo dhaafay, waxa ugu weyn ee sababayna waa abaarta.** Afar xilli oo isku xigta oo roob yaraani jirtay oo ay u raacday dadka dagaallo iyo isku dhacyo u dhexeeya kooxo hubaysan oo maamullo aan ka tirsanayn ayaa

■ Saamaynta abaartu ku yeelatay dakhliga dadku cunnada siiso meelaha miyiga ah



Isha xogta: Tirada sahanka 2017–18.

■ Aabaarta ayaa ah tan ugu weyn ee sababtay dadka gudaha ku barakacaya sanadihii la soo dhaafay




Isha xogta: UNHCR-PRMN, Jan 2016–Apr 2018.

sababay barakaca dhamaadkii 2016 ilaa dhamaadkii 2017. Kala bar dadkaan barakacay waa kuwo ay da'doodu ka yar tahay 15 jir, iyadoo 1 boqolkiiba ay yihiin dad ka weyn 64 jir, waxayna keentay tani inay ku tiirsanaadaan raashinka; qoysaska barakacayaasha ah celceliskooda ku tiirsanaanta wuxuu ka badan yahay 1, waxay tani tilmaamaysaa xubnaha gaaray da'diidi shaqada inay ugu yaraan quudin karaan hal carruur ah. Siyaasadaha ku aadan yaraynta saboolnimada iyo istiraatiijiyadda Soomaaliya waa in lagu ddaraa sidii xal loogu heli lahaa dayaca haysta barakaca iyo baahiyadaha dadka xeryaha gudaha ku barakacay haysta.

**Barakacayaasha guduuhu waa kuwa ugu badan ee nugul si loo hormariyo miyiga iyo magaalooyinka oo ay u helaan adeegyada nololsha waxaa la xoojin karaa taageero toos ah oo lagu siiyo sidii si iskood ah ay ugu noqon lahaayeen deeganadii ay ka soo barakaceen ama in lagu meeleeyo dadka ku nool goobahay u soo barakaceen**

**Barakacayaashu waxay wajahayaan saboolnimo daran iyo xaalado nololeed oo aad u adag marka loo eego dadyowga kale ee magaalooyinka degan. Inkastoo 70 boqolkiiba Soomaalidu sabool**

■ Barakacayaashu waa kuwo qaba saboolnimo daran marka loo eego dadka magalada degan




Isha xogta: Tirooyinka sahanka 2017–18.

tahay, barakacayaashu waa kuwo si gooniya u takooran; in ka badan 4 qof ee barakacayaasha ah 3 ka mid ah ayaa ku nool maalintii wax ka yar 1.9 doolar, iyadoo kala bar wax ka badan qoysaska barakacayashu ay wajahaan gaajo. Barakacayaashu waxay si balaaran u wadaagaan waxyaabaha aasaasiga ah sida musqulaha, goobaha biyaha laga dhaansado, adeegyada saxada iyo fayadhowrka goobahay degan yihiin. Degsiimooyinka barakacayaashu sidoo kale waxay ka durugsan ihiin adeegyada aasaasiga ah sida iskuulada, xarumaha caafimaadka iyo suuqyada. In la gaarsiiyo adeegyada aasaasiga ah ee ay ka mid yihiin caafimaada iyo waxbarashadu waxay tahay mid lagama maarmaan u ah hormarinta adkaysigooda durufaha haysta barakacayaasha. Celcelis ahaan, qoysaska abarakacayasha kala bar ka mid ah ayaa ka hela lacago qoysaska magaalada.

**Barakacayaashu waa kuwo ugu heeseeya ee dakhliga qof soo gala marka la eego, taasina waxay nolol dhererkoodu inuu gaabto.** Dadka iskuul gaartay dadka barakacayaasha ah waa kuwo aad u yar inay iskuul aadan marka loo bar bar dhigo qoysaska magaalooyinka ku nool. Dadka waaweyn ee barakacayasha ah waa kuwo waxna aan akhrin, waxna qorin marka la bar bar dhigo kuwo magaalooyinka. Waxbarasho ahaan wixii ka soo baxa barakacayaasha waxay la mid tahay waxa ka soo baxa dadka miyiga ah waxbarashadooda,

■ Keliya 3 qof ee carruurta barakacayaasha ee heerka waxbarashada gaartay mid ka mdi ah ayaa iskuul taga




Isha xogta: Tirooyinka sahanka 2017–18.

xitaa afartii barakacayaal ah saddex ka mid ah ayaa degan magaalooyinka. Farqiga helitaanka waxbarashada wuxuu ahaa mid xaasaasi ah iyadoo kala bar dadka Soomaaliyeed ay yihiin kuwo ka yar da'da 15 jir. Dhalyarta waa kuwo aan helin waxbarasho waana mid sii jiraysa, heerka dhererka nolosha ee waxbarashada, shaqaalaynta iyo guud ahaan bedqabka qofka ayeyna saamayn ku yeelanaysaa.

**Qoysaska barakacayasha ee ku nool magaalooyinka noloshoodu waa mid ka duwan intaysan soo barakicin ka hor.** Nolosha barakacayaasha ka hor barakacooda waxay k utiirsanayd musharooyin yar yar, ganacsiyo yar yar, beeraha, halka barakacayaasha maanta ay si balaaran ugu tiirsan yihiin mushahar, xawaalad iyo gargaarka. Barakacayaal badan ayaa loo shaqaaleeyey inay ka shaqeeyaan waxyaabo aan beero ahayn, iyadoo loo shaqaalaynayo goobo cusub.


**Barakacu waa mid saamayn xun ku yeesha bedqabka qofka.** Duruufaha dadka arrimaha cimilada la xiriira ka barakacay waa kuwo sabool ah, iyadoo ay haysato tayada hoy xumo ee ugu liidata marka loo eego dadka dagaalada ku barakacay. Dadka gudaha ku barakacay waxay joogto u noqdaan dib dhac ka dhashay barakaca, intooda badan ee ku sugan magaalooyinka waxay si hagaagsan u gaaraan goobaha caafimaadka. Qoysaska

**■ Ciriiriga iyo buuqa ka jira musqulaha waxay meesha ka saartay wanaagga saxada gaar ahaa goobahay barakacayaashu degan yihiin magaalooyinka**



Isha xogta: Tirada sahanka 2017–18.

**■ Noloshu magaalada waa mid ka duwan noloshii barakacayaashu ay ku jireen intaysan barakicin**



Isha xogta: Tirada sahanka 2017–18.

barakacayaasha ee masuulka ay ka yihiin haween lixdii ka mid ah ayaa xawalaadda lacag ka hesha marka loo eego qoysaska ay raggu hogaaminayaan. Barakacayaasha ladan waa kuwo ka kal-sooni badan barakacayaasha saboolka ah haddii dib u dejin lagu samaynayo sanadka danbe.


**Inta badan barakacayaashu waxay quud daraynayaan inay ku neegaadaan goobahay hadda degan yihiin, keliya in yar ayaa ka dareen bixisay inay doonayaan inay deganadoodii asalka ay u dega-naayeen ku noqdaan.** Qiyaasta 10kii barakace 7 ka mid ah ayaa doonaya inay ku sugnaadaan goobahay degan yihiin, keliya 2 ka mid ah tobankii barakace ayaa danaynaya inay ku noqdaan goobahay markoodii hore ka soo barakaceen. In ka badan 9 ka mid ah 10kii barakace hal marna qof ka mid ahi ma soo fiirin deegaankii uu ku noolaan jiray tan iyo intay ka soo barakaceen. Inta badan barakacayaashu arrimaha amaanka ayaa ah sababtay u danaynayaan inay ku sugnaadaan goobahay hadda degan yihiin, 8 ka mid ah tobankii barakace ayaa sheegay inay badbaado ku haystaan goboahay hadda ku sugan yihiin ama ay nabad gelyo buuxa ku haystaan. Barakacayaashu waxay kaloo cadeeyeen inay xiriir wanaagsan la leeyihiin bulshooyinka ku nool goobahay ku soo barakaceen, 9 ka mid ah 10 barakace ayaa sheegay inay si wanaagsan u

macaamilaan bulshada ku hareeraysan ee ah kuwa marti geliyey.

**Maqnaanshaha hab isku xiran oo rasmiya oo bedqabka ah, qoysaska Soomaalida intooda badan qorshaha bed qab ee ay leeyihiin mid ay samaysteen**

**Soomaalida waxaa nugleeyey dhibaatooyin kala duwan oo isu daba maray oo ku riday wareer joogto ah, waxayna dhibaatooyinkaase ku keeneen saboolnimo, nuglaan iyo barakac.** Qiyaasta saddexdii qoys laba kamid ah oo qiyaas ahaan noqonaysa tirade dadka 66 boqolkiiba ayaa dhibaatooyinka la kulmay 12 bilood ee la soo dhaafay. Kuwa dhibaatooyinka la kulmay, kala bar ka mid ahi dhibka waxay ka soo gaartay abaarta, afartii qofna mid ka mid ah dhibka wuxuu ka soo gaaray dalagiiisii ama xoolihii oo ka baaba'ay iyo biyo yaraan iyo daaq la'aan lo'diisii ama beertiisii ku dhacday. Mid ka mid ah shantii qoysna waxaa ku soo noqnoqday cunno yaraan, laba ka mid ah shantii qoysna waxaa sanadkaas gudihiisa la kulmay dhibaatooyin kala duwan. Saamaynta xun ee ay ku yeeshen waa mid ka weyn noocyada kala duwan ee dhibaataada ku soo noqnoqotay. Qoysaska saboolka ahi waa kuwo soo maray wax


Inta badan barakacayaashu mar rabaan inay noqdaan



Isha xogta: Tirada sahanka 2017–18 iyo SPS 2017.



■ Inta badan barakacayaashu goobahay hadda ku sugan yihiin waxay u soo doonteen nabad gelyo, marka laga soot ago sababaha asal ahaan ka danbeeya barakacooda



Isha xogta: Tirada sahanka 2017–18.

ka badan hal dhibaato. Qoysaska Soomaalidu ee dhibaatooyinka wareerka ku riday soo maray waxaa la sheegay inay yihiin cunno la'aanta, hanti yaraan, waxba aysan u kadaysanayn iyo farsamada ay ku heli karaan dhaqaale oo hoosaysa, waxayna u badan yihiin kuwo dhibkaasi markasta ku dhaco.

**Qoysaska noloshoodu waxay inta badan ku tiirsantahay damanad qaad naftooda ah oo ay la socdaan dhibaatooyin.** Tani waxay tilmaamaysaa inaysan jirin hab ku filan oo maraaynta khataraha iyo nidaamyada ka hortagga masiibooyinka, sidoo kale waxaa maqan habka isku xiran ee bedqabka. Adkaysiga qoysasku leyihiin waa mid ku tiirsan naftooda kaliya ama waa mid ku salaysan hadba dhinacii mawjaddu u qaaddo oo aysan waxba ka qaban karin. Haddii dagaal qabsado ama budhcad dhacdo ma lahan hab rasmiya oo ay ku maa-reeyaaan farsamo ay xal ugu heli karaan iyo qaab dhismeed sharci. Nuglaanta waxay qoysaska la wadaagtaa farsamada ay ku gaarayaan suuqyada. Tani waxay ku sii kordhisaa dacyanaanta qoysaska haysta, khaas ahaan bulshada la takooray. Haddii qoysasku aysan haysan hab rasmiya oo isku xirka beqabka ah, kaasoo u keenaya inay u dayacnaadaan dhibaatooyinka. Inkastoo ay ka saboolsan yihiin kuwa iyaga la mid ka ah.

**Habka isku xirka bed qab ee bulshada iyo nidaamyada ilaalinta bulshada ayaa loogu baahan yahay si loo dhiso maaraynta khataraha iyo awoodda wax looga qaban karo inay qoysaska nuglaadaan.** Nidaamka isku xir ee bedqabka bulshada waxaa ka mid ah hagaajinta dakhliga iyo isticmaalka si loo dhiso adkaysiga iyo inay qoysaska awoodaan inay ka gudbaan ama ka soo kabtaan dhibaatooyinka. Nidaamka lacag toos ah oo loo diro wuxuu gacan ka geysanayaan yaraynta saboolnimada. Guud ahaan dunida, wadamadu waxay doonayaan inay ku bixiyaan 2.5 iyo 5 boqolkiiba wax soo saarka gudaha wadanka barnaamijyadaan oo kale. Celicelis ahaan wadamada Afrika ee ka hooseya saxaaraha celi celis ahaan waxay ku kharash gareeyaan keliya 1.6 boqolkiiba dakhliga guud ee wadanka nidaamka isku xirka bedqabka bulshada. Soomaaliyana waxay ku kharash garaysaa wax ka yara 0.8 boqolkiiba guud ahaan wax soo saarka wadanka nidaamka bedqabka dadka sanadkii 2016, inkastoo dakhliga guud ee Soomaaliya soo gala 16 boqolkiiba yahay gargaar bani'aanimoo oo gaaraya 1.2 bilyan oo doolarka Maraykanka ah. Haddii loo isticmaalo dhaqaale si wanaagsan loogu meeleeeyey hanaanka isku xirka bedqabka bulshada wuxuu gacan ka geysan karaa yaraynta saboolnimada. Qoysaska lacagaha ka hela xawaaladaha

waxay lacagahaas u isticmaali karaan hanaan ay maal gelin ku samayn karaan, kayd iyo talaabooyin kale oo ay ku abuuran karaan dakhli abuur.

**Lacagaha dibadaha laga soo diraa waxay qayb weyn ka qaataan waxay qutaan qoysaska, qiyaas ahaan 40 boqolkiiba ayana hela**

**Xawaaladuhu waa il dhaqaale oo weyn oo ah lacag dhinaca horumarinta ah oo Soomaaliya dibadda uga timaadda.** Dadka Soomaaliyeed ee muhaajiriinta iyo qaxootiga ku ah dibadda waxay tiradoodu aad sii laban laabantay intii u dhaxaysay 1990 iyo 2017, iyadoo wakhtigaan ay dibadda jiraan 2 milyan oo qof oo Soomaali ah. Intii u dhaxaysay 2015 ilaa 2017, qurbo joogta Soomaalidu waxay dib ug soo celiyeen guda wadanka aduun gaaraya 1.3 bilyan oo doolar sanadkii, laakiin waxaa dhici karta in lacagtu intaas ka badan tahay waayo waxaa adag in si saxan loo xisaabiyo lacagaha xawaaladuhu soo diraan iyo habkay lacagaha u kala gudbiyaan. Lacagta xawaaladaha lagu soo diro waxay dakhliga wadanka ka tahay 20 boqolkiiba, waa lacag u dhiganta tan gargaarka sanad kasta loo siiyo Soomaaliya, waxayna saaddex goor ka badan tahay maalgashiga tooska ah ee dibadda uga yimaadda Soomaaliya. Lacagaha xawaaladuhu waxay ku yimaadaan nidaam qaraabo iyo axsaab lacago isu soo dirta, waxaana inta badan lacagahaas la soo diraa marka dhibaato dhaqaale jirto, masiibooyinka, dagaalada iyo marka dhibaatooyina kale jiraan.


**Qoysaska ka hela lacagaha xawaaladaha waxay u badan yihiin kuwo aan saboolnimo ku dhici.**

Keliya 58 boqolkiiba qoysaska lacagaha ka hela xawaaladaha gudaha Soomaaliya ayaa sabool ah. Marka la bar bar dhigo 71 boqolkiiba qoysaska aan ka helin lacagaha xawaaladaha. Qoysaska Soomaalidu waxay isugu jiraan qoys lacag ku diraa xawaalad ama ka hela, laakiin helitaanka lacagaha ayaa aad ugu badan qoysaska ku nool magaalooyinka, halka qoysaska ku nool xeryaha lagu barakacay ay ku yar yihiin kuwo lacago xawaalado dibadda ka hela. Inkastoo ay jiraan farqi, dadkaan ku nool xeryaha lagu barakacay ee dibadda ka hela lacagaha waxay helaan xaddi lacag ah oo u dhiganta inta qoysaska magaalada ku nooli helaan. Celi celis ahaan, dadka lacagaha ka hela xawaaladaha dibadda waxay helaan 743 doolar sanadkii, tanoo ka badan celicelisa dakhliga qofka Soomaaliga ah oo dhan 535 doolar qofkii qiyasta 2017. Sidoo kale waxaa muhiim ah lacagaha gudaha la isaga diro ee miyiga iyo magaalooyinka look ala diro, sidoo kale qoysaska barakacayasha eek u nool banaanada degsiimooyinka.

**Qoysaska lacagaha ka hela xawaaladaha dibadda waa kuwo dakhli fiican soo galo, leh isticmaal dhaqaale oo wanaagsan, waxay helaan kharash ay ku bixiyaan waxbarashada.**


Lacagaha xawaaladaha dibadda laga helana waxay qiyaas ahaan ka tahay 34 boqolkiiba dakhliga dadka soo gala, waxay u dhowdahay dakhliga mshahar ahaanta u soo gala qoysaska oo ah 35 boqolkiiba. Sidoo kale lacagaha gudaha la isaga xawilo ayaa ah cel celisa ahaan 23 boqolkiiba dakhliga guud ee

**Sida ay tahay lacagaha xaawaladaha lagu diro ama laga helo**




Isha xogta: Celceliska tirade sahanka 2017–18.

■ Cecelis ahaan lacagaha xaawalahada laga helo ayaa laba goor ka badan kuwa lagu diro



Isha xo: Celceliska tiradaha sahanka 2017–18.

■ Lacagaha xawaaladaha dibadda laga helaa aad bay muhiim u yihiin waana 40 boqolkiiba



Isha xogta: Celceliska tirade sahanka 2017–18.

qoysaska ay helaan. Xaawlaaduhu waxay muhiim u yihiin aasaaska iyadoo 40 boqolkiiba ay tahay dakhliga dadka ay helaan tanoo u taagan 54 boqolkiiba dadku dhaqaalahay isticmaalaan, halka xawaaladuhu qiyaas ahaan ka taahy 23 boqolkiiba, isu geynta isticmaalka dadkuna wuxuu ka koreeyaa 60 boqolkiiba. Qoysaska lacagaha xawaaladaha dibadda ka helaa waa kuwo kharas garayn badan markay timaaddo waxbarashada marka la bar bar dhigo qoysaska aan iyagu ka helin lacag xawaaladaha. Qoysaska xawaaladaha dibadda ka hela lacagaha waxaa badan isu diwaan gelintooda waxbarashada marka la bar bar dhigo qoysaska aan ka helin.

**Suuqa kala xawilista lacagaha ee gudaha Soomaaliya waa mid aan homarsanayn, qiimahiisuna koreeyo laakiin waa bootin kara farsamada casriga ah ee taleefoonada.** 46 boqolkiiba lacagaha gudaha

lagu kala xawilo waxay maraan nidaamka taleefoonada gacanta, halka 47 boqolkiiba ay maraan nidaam caadiya oo qof xafiis fadhiga loo geynayo iyo dariiqyo aan rasmi ahayn, sida inaad lacag gacanta ku sii qaado markaad qoys booqonayso ama aad xawaalad geyso. Sidaa darteed, 87 boqolkiiba lacagaha dibadaha laga soo diro waxay soo maraan lacag la geeyo xafiis oo qof shaqaynaya loo dhiibo kadibna uu soo diro, 12 boqolkiibana waxay soo maraan hanaanka taleefoonada gacanta. Khidamada lacagaha Soomaaliya loo dirayo laga qaado ayaa kordhay kadib markii la soo rogay sharciyada kala gudbinta lacagaha, iyadoo taasina sidoo kale keentay in tiradii xawaaladaha lacagaha dirayey yaraadaan, waxay yaraysay tartankii iyo dhiiri gelintii dariiqyada aan rasmiga ahayn. Sidaa darteed, markay xawaaladuhu yihiin isha noloshu ee dadka saboolka ah, lacag loo diro Soomaaliya waa mid qiimo sare leh, markaad Ingiriiska ka soo dirayso

ee Soomaaliya u dirayso wuxuu yahay qiimaha mid laba goor ka badan nidaamka SDG iyadoo gaaraysa 3 boqolkiiba, markaad lacag ka soo diray Ustareeliya waa mid iyaduna saddex goor ka badan nidaamka higsiga yaraynta saboolnimada (SDG).

***Yaraynta saboolnimada iyo ka hortadda dayanaana Soomaaliya waxay u bahan tahay dardargelin lagu sameeyo kobaca dhaqaalaha, horumarinta adeegyada, maarayn lagu sameeyo deegaamaynta magaalooyinka, iyo maal gelin u adkaysiga iyo habka isku xiran ee bedqabka oo ay ka mid tahay in lacagaha xawaaladaha lagu soo diro si wax tar leh loo adeegsado***

**Fursadaha kororka dhaqaale, khaas ahaan dhalnyarta, waxay aasaas u tahay in la joogteeyo yaraynta saboolnimada, ka hortag lagu sameeyo nuglaanshaha iyo in la baajiyo qul qulatooyin.** Soomaaliya waxay leedahay dhalnyaro badan, marka waa in dhalinyartaasi ay awood u heshaa shaqo helista si ay kororka dhaqaalaha uga qayb qaataan. Baahida shaqo joogto ah oo ay helaan dadka barakacayaasha ah waxay khaas u tahay inay dadkaas qaab nololeedkooda isbedel degdeg ah ku samayso, sidoo kale ay wax ka bedesho habkooda isku xiran ee bedqabka. Siyaasaduhu waa in la dhiiri geliyo ganacsiga iyo hal abuurka si loo abuurro shaqooyinka loo baahan yahay, loogana hor tago in dhalinyarto maalayacni meelaha u fariisato oo aysan uga qayb qaadan dagalada. Waxaa intaas dheer, gaarista suuqyada gudaha waxay kordhisaa isku xirnaan, isku xirka hawlaha dhaqaalaha iyo yaraynta saboolnimada.


**Hormarinta bixinta adeegyada, khaas ahaan waxbarashada waxay muhiim u tahay qiimaha shaqo ee qofku yeelanayo iyo yaraynta sinaan la'aanta ka jirta wax qaybsiga haweenka/gabdhaha, barakacayaasha iyo miyiga iyo qoysaska reer guuraaga ah.** Siyaasadahaan waxay noqon doonaan ujeedkoodu si loo homariyo helitaanka waxbarashada iyo kor u qaadista is diwaan gelinta goobaha waxbarashada iyadoo la tix gelinayo kala qaybsanaanta iyo baahiyaha sida gaarka ah ay u qabaan bulshada nugul. Kordhinta helitaanka waxbarashadu ee carruurta iyo dhallinyartu waxay siinaysaa inay noqdaan kuwo wax soo saar badan leh qaybaha danbe ee noloshooda iyo inay kor u qaadaan heerkooda nolasha. In la dhiso iskuulo badan waa ujeedada koowaad, laakiin waxay u bahan tahay in wax badan loo bahan yahay la

qiimeeyo culaysyada ka jira, qiimaha dhismaha iyo naqshadaynta iyo fulinta siyaasadaha waxbarashada. Caqabadaha ka taagan kor u qaadista tirade diwaan gelinta waxbarashadu waa mid sii socon doonto samayna ku sii yeelanaysa qaab-dhismeedka iyo tirade dhalinyarada. Iyadoo weli helitaankeedu yaahy caqabad weyn, iyo in la qaato talaabo muhiim u ah, siyaasadaha in lagu yareeyo tirade saraysa ee waxbarasho la'aanta ah iyo kor u qaadista heerka waxbarashada la helayo ayaa ah waxa loo baahan yahay.

**Magaalooyinka Soomaaliya waxay u bahan yihiin maalgelin lagu sameeyo maamulka dhulka iyo isku duwidda kaabayaashooda dhaqaalaha.** Magaalooyinku baahidooda ugu daran ee ay qabaan waa helitaanka nidaam rasmiya oo la xiriira maamulka dhulka iyo isticmaalka qorshayn dhuleed si loo ilaaliyo kororka iyo bixinta lahaanshaha dhulka la siinayo barakacayaasha. Isku duwidda kaabayaasha dhaqaalaha oo maal gelin lagu sameeyo si loogu jaan gooyo qorshayn waay abuuri kartaa wada shaqayn dhex marta qaybaha kala duwan ee kaabayaasha dhaqaalaha. Maalgashiga magaalo waxay u bahan tahay in la isu duwo xalinta baahi kasta. La faahfaahiyo heerka magaalo kasta joogto laguna sameeyo qiimayn baahideeda si loo fahmo caqabaddaha magaalaynta ka jira iyo xalka laga gaari karo, iyadoo la tix gelinayo baahida barakacayaasha si loogu fududeeyo inay si sahlan bulshada u dhex galaan. Siyaasad dhaqaale waa in ay tahay mid lagu tix gelinayo farshaxanka iyo fulinta siyaasadaha si loo qiimeeyo fursadaha mustaqbalka, khataraha, guulaha iyo khasaaraha ka yimaadda siyaasaddaha, sidoo kale caqabadaha ka hor imanaya fulinta. Waxaa muhiim ah in la xoojiyo hay'addaha maamulka dawladeed si loo jideeyo kaalmada horumarin iyadoo loo marayo qaab wada shaqayn ah. Dawladda dhexe iyo kuwa degmooyinka, inay masuul kawada ahaadaan bixinta adeegyada maamul iyo inay wax badan ka qayb qaadan karaan.

**Gudaha magaalooyinka, baahida barakacayaasha aan ku noolayn degsiimooyinka waa in lagu xaliyaa iyadoo loo marayo hab la dejin loogu samaynayo.** Meelaha salka u ah ee la doonayo in la gaaro waxay xaqiijin karaan sinaanta ka dhex jirta qaybaha bulshada nugul ee magaalooyinka. Kaalmadu waxay xoogga saaraysaa barakacayaasha ku nool xeryaha ku yaal magaalooyinka oo ah kuwa inta badan hela, laakiin barakacayaasha magaalooyinka ku sugan ee aan xeryaha ku noolayn waa inay si lamid ah kuwa xeryaha ku jira u helaan adeegyada. Intaas waxaa dheer, waxay si joogto ah

## ■ Dakhli aan jirin ayaa dhibaato ku ah qoysaska miyiga



Isha xogta: Celceliska tirooyinka sahanka 2017–18.

aysan ugu sinayn waxyaahba horumarinta ah ee yimaadda marka la bar bar dhigo qoysaska kale ee magaaloyinka ku nool. Waxaa arrintaan sababay, qoysaska barakacayaasha ah ee aan deganayn xeryaha way adagtahay in la gaaro, waxaa muhiim in lagu daro barakacayaasha aan xeryaha ku noolayn adeegyada muhiimka ah ee la gaarsinayao dadka saboolka ah ee ku nool magaaloyinka. Kooxaha la gaaro waxaa xoogga lagu saaraa barakacayaasha xeryaha ku jira. Gaarista meelaha saboolka ah ee magaaloyinka ayaa iyana ah gaarid kale, horumarinta waa in lagu jaan gooyaa qorshayaansha horumarineed ee magaaloyinka.

**Maalgelin lagu sameeyo adkaysiga ayaa loo baahan yahay si looga hor tago in noloshu qoysaska nugul eek u nool miyiga ay baaba’do, khaas ahaan wixii abaar ah ee mustaqbalka imanaya sidii ay ugu adkaysan lahaayeen.** Dhibaataadii dhacday abaartii 2016 iyo 2017 ayaa lagu qiyaasay inay kordhisay saboolnimada miyiga 65 ilaa 75 boqolkiiba. In maalgelin lagu sameeyo adkaysiga iyo inay dadka miyiga ku nooli gaari karaan suuqyada waxay caawin kartaa in laga hor tago noloshu qoysaska baaba’aysa. Talaabooyinka la qaadi karo waxaa ka mid ah caymis loo sameeyo beeraha, in qoysasku helaan goobo kala duwan oo dakhli ka soo geli karo iyo in la hormariyo jidadka iyo helitaanka biyo nadiif ah.

**Lacag cadaan ah oo loo diro waxay ka caawin kartaa inay dhiso adkaysigooda, khaas ahaan qoysaska saboolka ah ee iyagu aan haysan wax rasmiya iyo cid caymisa.** Ilaalinta kooxaha nugul iyo abuuritaanka fursado dakhli ayaa muhiim u ah ka hortagga saboolnimada carruurta ee ay kula

kori lahaayeen ilaa qaangaarnimadooda. Qoysaska saboolka ahi waa kuwo inta badan u nugul dhibaatoyin soo maray aadna ugu xiran saamaynta mucaawimada. Nuglaanshaha darani wuxuu la xiriira inuu u jiido khatar, laakiin intay heli karaan wax caymin kara iyo habab kale oo yaraytna khataraha ah waxay gacan ka siin kartaa qoysaaska saboolka ah inay ka yaraato cabsida. Celcelis ahaan wadankoo dhan, qoysasku waxay quutaan waxaa la kordhin karaa 0.74 doolar halkii doolar ee kasta ee loo diro. Degaano khayraadka helitaankiisu ku yaryahay sida Soomaaliya oo kale, waxaa loo baahan yahay in gargaarka bani’aadanimo ee heerka dhow iyo kan dhexeba lagu jaan gooyo hab isku xiran oo bedqab bulsho ah.

**Xawaaladuhu, waxay door muhiim ah ka qaataan adkaysiga iyo maal gelinta Soomaaliya, siyaasado loo sameeyana waxay faa’iido u tahay fududaynta adeegyaday bixiyaan.** Bixinta taleefoonada gacanta iyo kororta tartan furan wuxuu dhimi karaa khidmadaha, sidoo kale wuxuu soo saari karaa wax cusub, tartan ka dhexeeya adeeg bixiyayasha iyo abuurista kaabayaal dhaqaale oo furan oo lagu bixinayo hab adeeg degdeg ah lacag bixinta. Waxay kaloo la diraysaa khidmadaha sareeya ee lacagaha xawaaladaha lagu diro, in si khaldan lacago la isgugu dugbiyo iyo ka hortagga la doonayo in lagu sameeyo lacagaha loo diro argagixisada. Soomaaliya waxay ku shaqaynaysaa iyadoo u hogaansan EML/CFT iyo abuurista cadaymaha nidaamka casriga ah si loo yareeyo khatarta bangiyada caalamiga ah. Xawaladlayaashu waxay faa’iido ka heli karaan nidaamyada cusub ee dhaqaalaha ee la soo saaray sida hanaanka caysmida maaliyadda iyo shuruudaha lacag bixinta tooska ah.

## Box 1 ■ Websiteyada Soomaaliyeed waxay dunida la wadaagaan codadka ugu yar

**Heerka saboolnimada wadanku waxay taagan tahay 69 boqolkiiba, mana sheegayso xarbiga maalinlaha ah ee dadku ku jiraan.** Saaomaaliya waxaa ka taagnaa wakhti dheer isku dhacyo hubaysan iyo masiibooyin bani'aadanimo. Abaarihii wakhtiyadii la soo dhaafay waxay saamayn ku yeesheen nolosha malaayiin qof, iyadoo ay uga sii dartay nuglaanshihii dadka horay u haystay. In la caymiyo nolosha qoysaska waxay noqotay wax aad u dhib badan qiyaasta 69 boqolkiiba tirada dadka Soomaaliya ayaa hadda ku nool saboolnimo. Qiyaasta saboolnimadu waxay muhiim u tahay is bar bar dhigga iyo qiimaynta si loo sheego siyaasadaha iyo barnaamijyada. Sidaa darteed, tirada maangalka ah ee saboolnimadu ma ahan mid tusinaysa dadka dhiban inay dadkaasi noqonayaan kuwo ka baxa dhibka. Sahanka labaad ee SHS waxaa loo adeegsaday aalad gacanta lagu qaado si loo ururiyo xogta. Dhamaadkiina waxaa la sameeyey sahan tayeysan, jawaabaha la waydiiyey si mutadawcnimo leh ayaa loo diwaan geliyey fariinteeda si degdeg ah.

**Bogagga websaytyada Soomaalida waxaa ku jira boqolaal muuqaallo ah oo taariikh ahaan loo duuban oo la qabtay wakhtiyadii goobaha shaqada lagu jiray oo laga qabtay codada dad iyo bixinta sida saxda ah ee xogta.**

Bogaggu waxay xaqiijinayaan aragtida sahanka heerkiisu sareeyo ee Baanga Aduunku ka fuliyey Soomaaliya, waxaa intaas dheer muuqaalo taariikhiya oo ingiriis iyana ku duuban, kuwaasoo muuiinaya xaaladdaha xun ee ka jirta gudaha iyo siday u egtahay heerka saboolnimada haysata dadka Soomaaliyeed iyo noloshooda. Muuqaaladu waxay muujinayaan dareenka awood la'aanta, xanuunka gaajada, rajo la'aanta keentay isku buuqa iyo walaa-howga iyo inay dadka Soomaaliyeed muujiyaan niyad jab ka dhashay wixii duruuf soo maray. Fursadaha codadka waxaa ka mid ah dadaalo ay kaga jawaabaya tanoo ah talaabada ugu horaysa ee lagu xoojinayo ugu yaraan in aduunka la gaarsiyo codadaka, una ogolaanaya inay u sheegaan aduunka siday noloshuudu tahay. Sidoo kale waxay xoojinaysaa in la sii wado dariiqyado kala duwan oo lagu caawinayo iyo malaayiin iyagoo kale ah oo ka baxsanaya saboolnimo. Boggagga websaydayada Soomaalida goobaha laga heli karaa waa kuwaan soo socda:

<http://www.thesomalipulse.com>



